

Talaammiinta iyo Qowsaarrada Soomaaliyada Maanta

A. M. Yusuf© | wayeel@operamail.com

◀Midka adhiga mamuli yaqaan moorada iyo geela
Ama saca maqarka u sidee baadiyaha meera
Maqalraacu Soomaali waa mudaneheediiye▶

--Abwaan Garnayl Kude Uurgub: Maxaad Ka Taqaan Midgaan?

HADDII AY MINDIDU DHICI LAHAYD soofe la'aan; ardaygu na uu dhici lahaa tababar la'aan, koodna, doocna ma tareen. Birtu, afeys la'aan, waa ay saawiri lahayd; ardaygu na, ababin la'aan, sawir ayuu noqon lahaa.

ARDAYGU WAA BILLAAWE oo kale. Birtii aan soofeha la dabo wadin; waa ay afbeeshaa; ma na dhalaasho. Ma og tahay, biraha, si kasta ay u adadag yihiin, dabku in uu nuleeyo? Billaaweha, haddaba, si loo afeeyo, raran ayaa la dhex ruubiyaa. Horta hore ba, waa in dab naar ah la dhex dhigaa. Haddee dabka aan dhimbishiisa laba dibnood ama babbis ama ba buufiye lagu afuufin se; shiditaanka, qumaati ama ba ciyoon u ma ololo. Intaas se ku ma filno; si galleeftii ay u yeelato af wax gudi og. Si loo qaabeeyo, mararka qaarkood ayaa ba loo baahdaa in billaawahii la tumo; looga na maarmi waayaa in dubbe lala dhacdhaco.

Biraha soofe laga ma dhowro; dab na looga ma damqado; dubbe na looga ma naxo. Intaas oo dhan na wanaagooda ayaa ku jira.

TOLOW ARDAYDA NA maxaa lagu afeeyaa? Ardaygii aan hanuunin laga wadin; waa uu marinhabaabaa. Wuu bahaloobaa. Ma og tahay, ardayda, si doonto oo ay madax adadag yihiin in ay aqoontu nugleyso? Ardayga si loo ababiyo, “*waadiga dugsiyada*” ayaa la dhex geeyaa; aqoon baxayso ayaa sheedda loo fariisiiyaa. Horta hore ba, waa in hooygii aqoonta lagu daraa. Haddee ardaygii aan dhegtiisa lagu afuufin “*neeftii garasho*,” isagu na, waxbarashada qumaati ama ba ciyoon ugu ma barbaaro. Si loo kiciyo ardaygii, labada dibnood ee macallinka ayaa aqoon lagula afuufaa -- walow bushimihii ustaadka la'aan tood na aan uu wax saas u sii ridan ba kuu garan doonin. Intaas se ku ma filno; si xertii ay u yeelato tayo waxkuool ah. Si loo horumariyo, mararka qaarkood ayaa ba loo baahdaa ardaygii in la laylo; laga na fursan waayaa in kutubbo lagu cadaadiyo.

ARDAYDA ababin laga ma dhowro; dugsi na looga ma damqado; kutubbo na looga ma naxo. Intaas oo dhan wanaagooda ayaa ku jira.

QOWSAARRADII QARANKA, talaamiintii beelihii Soomaalida, ajidii weligeed isla soo qabweynaan jirtay -- indhoweyd ba, badowdii ayaa ba gunnimo tii ugu foolxumayd ku dambeysay. Alleylehe, gobnimo is seegé. Hadda iyaga ayaa ba BIRTA u tuma Tigreegii reer Itoobiya.

ILBAXNIMO CUSBOON. Waxa kasta oo tayo lahaan jiray, haddii diin ama hidde iyo tacliin ama ba qarannimo ay ahaan jireen, haatan dalkeennii waa ku gabaabsi. Dugsi, xero maxaysato ayaa laga doortay. Daljire, Woyane ayaa laga doorbiday. Hawlihii qaranka, qowle ayaa loo xilsaaray. Wadaad, bare iyo ustaad ba waahore ayay joogsadeen. Jengeligu se, meheradlaawuhu se, dagaalooquhu se, mooryaanku se, DABADHILIFKU SE -- ka ba sii fara badan faltida lo'dii ay 'mijiga la meeri jireen'.

MURTIDII ABWAAN GARNAYL waa tii aan ku billaabay qoraalkaygan; sidaas oo kale waxa aan jeclaan lahaa in aan ku gunaado: *doodo ku saabsanaa qarankii Soomaaliyeed ee waahore*, gedda abwaan jiray uu ula darandoorriyay shimbirta la yiraahdo fiinta. Hoos waxa ah laba tuduc oo aan kaaga soo qaaday gabaygii **Cali Xuseen Xirsi (Cali-Makaadsade)**. Waa gabay ku caanbaxay magaca "FIIN":

**Waxay tidhi: "Or beenaad waddaa ina Xuseenow'e
Ugaas iyo qabiilnimo kuwii ubax ku faanaayay
Abtirsii madoodii kuwii lagu alhuumeeyey
Waataa albaabkii la yimi agabtu noo tiille
Miyaan maanta aafaadkan dhacay amarkan loo sheegin?"**

**Waxaan idhi: "Ilaaq bay hayaan edebna lays waaye
Afkuun bay ka tookhaan sidii ooryahoo kale é
Bootada ardaayada haddii aad asali mooddo
Aduun baa awaaraha ku lumi oo ilka caddayne."**

HALKAAS MARKA AY MARAYSO, walaal, waxa aan jeclaan lahaa in aan kuu sii raaciyo hal tuduc oo kale oo ka mid ahayd maansadiisa kale ee la yiraahdo "**Gam'i Waayay Soomaaliyeey Gocoshadiinniye**". Eeg Cali-Makaadsade sida uu Soomaalinnimada ugu na soo halgamay; iyo labaddaraadle sida Soomaalida uu misana u jeclaan jiray. Waxa uu yidhi halyaygii:

**Sida gaari kii qabay dhintoo galab la sii qaaday
Oo geeridiisii ilmada gabax ka siinaysa
Oo gorodda loo suray midaan gabadhu dooneynin**

Gam'i waayey soomaaliyeey gocoshadiinniye.

DABUUBTII QORAALKA

WEYDIIN CULUS. Qowsaarrada dufoobay, **so'maallada** qarankeennii iibsaday, sidee dibuhabeyn loogu sammeyn karayaa? Mise geed koray, goyn mooyaane, toosin ma galo? Haddii ay warcelintu **togan** tahay -- haddii ay '**haa**' tahay -- haddaba walaalayaalow yaa ii sheegi karaya **wax galtida aan looga turin asii uu wanaagoodu na ku jiro?**

.
. .
.

A. M. Yusuf© (wayeel) | wayeel@operamail.com